

**Gudaha Washington, D.C.:**

Nadine Ghannam  
Talefonka: +1 (202) 684 0832  
limaylka: [nsghannam@ifc.org](mailto:nsghannam@ifc.org)

**Gudaha Nairobi:**

Peter Warutere  
Talefonka: +254-20-322 6444  
limaylka: [pwarutere@worldbank.org](mailto:pwarutere@worldbank.org)

**Warbixinta IFC iyo Baanka Adduunka Waxay Heshay Jawi Ganacsi Xooggan Gudaha Hargaysa, Inkasta oo ay Jiraan Carqalado**

**Hargaysa, Oktobar 10, 2012**—Warbixinta cusub ee IFC Baanka Addunka waxay heshay in nabadgalyada iyo ammaanka gudaha Hargaysa tobaneeyihii sanno ee tagey ay u saamaxday inuu kobco qayb firfircoon ee ganacsi, inkasta oo ay iska-horimaadyo iyo dabacsanaan ka jirto jiidda hareeraha ka xiga.

Iyada oo maanta la soo saaray, Ganacsi Ka-samaynta Gudaha Hargaysa 2012 “*Doing Business in Hargeisa 2012*”, markii ugu horraysay waxay bixinaysaa xogta heer-hoosaadka habdhaqanka nidaamka ganacsiga ee ganacsiyada maxaliga iyo dhexdhexaadka ah ee gudaha Hargaysa, xarunta dhaqaalaha ugu weyn ee Soomaaliland. Kadib dagaalkii sokeeye ee 1980-kii, Soomaaliland keli ahaan ayey uga go’day Soomaaliya 1991, laakiin weli ma heli ictiraaf caalami ah.

Natiijooyinku waxay muujinayaan in dawladdu ay qaaday tallabooyin ay ku dejinayaso hay’adaha qaar iyo sharciyada daruuriga u ah ganacsiyadu inay shaqeeyaan. Nidaanka cadaaladda ayaa dib loo dhisayaa, oo xirfadyahanada xeerarka ayaa dib uga soo noqonaya dibedaha ama ka qalin-jabinaya jaamicadaha dalka gudahiisa. Misna caqabado ayaa jira, ay ka mid yihiin hirgelinta xeerarka ganacsi ee mudan, iyo dhigidda nidaam bangi oo rasmi ah.

Warbixintu waxay eegtay 11 jiidood oo nidaam: bilaabista ganacsi, la-tacaalista ruqsadaha dhismaha, helista korontada, diiwaangelinat bhanti dhuleed, helista deyn, dhawritaanka maalgeliyayaal, bixinta cashuuraha, ka ganacsiga xuduudaha dhankooda kale, xoojinta qandaraasyada, xallinta muranada, iyo shaqalaynta shaqaalaha.

“Waxa ka qabsoomaya Hargaysa waa kala duwan yihiin mawduuc illaa mawduuc,” ayuu yidhi Pilar Sánchez-Bella, oo ah qoraha labaad ee warbixintu. “Sahlanaanta helista ruqsadda dhismaha, helista korontada iyo diiwaangelinta hanta dhuleed, hay’adaha maamula jiidahaas waxay u shaqeeyaan qaab hufan. Laakiin Hargaysa waxay u baahan tahay in ay hagaajisy habdhismeedka cadaaladda si loo ilaaliyo jawi caafimaad-qaba oo dhiirigeliya ganacsatada maxaliga ah si ay u bilaabaan ganacsi, oo isna gargaari doona abuurista shaqo iyo horumar.”

Warbixintu waxay samaysay afar soo-jeedimood oo guud oo la xiriira hagaajinta nidaamyada sharci ee Hargaysa: dhamaystirka habdhaqanka xeer iyo sharci; qeexidda nidaamyada diiwaangelinta ganacsiga, ruqsadaha dhismaha, iyo diiwaangelinta nantida dhulka; yaraynta kharashka dhammaan tilmaamayaasha la qiyaasay; iyo hagaajinta waafaqsanaanta xeerarka.

Daraasadda waxa soo-saaray Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Soomaaliland oo waxa lagu maalgeliyey lacag uu leeyahay Baanka Addunka, iyo taageero ka timid Waaxda Kobcinta Caalamiga ee U.K., Wakaaladda Kobcinta Caalamiga ee Dhaanishka, iyo Maalka Dhisidda Ammaanka iyo Qanaka ee Baanka Adduunka.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo [www.doingbusiness.org/hargeisa](http://www.doingbusiness.org/hargeisa) iyo [www.doingbusiness.org](http://www.doingbusiness.org). Noogu kaalay [Facebook](https://www.facebook.com/DoingBusiness.org) ee [www.facebook.com/DoingBusiness.org](https://www.facebook.com/DoingBusiness.org).

**Kooxda Baanka Adduunka**

Kooxda Baanka Addunka waa ilaha ugu weyn adduunka ee maalgelinta iyo aqoonta dalalka soo koraya. Waxay ka kooban shan hay’adood oo si dhaw isugu xidhan: Baanka Dib-u-dhiska iyo Kobcinta “International Bank for Reconstruction and Development (IBRD)” iyo Ururka Kobcinta Caalamiga ah “International Development Association (IDA)”, oo wadajir ahaan u ah Baanka Addunka; Sharikadda Caalamiga ee Maaliyadda “International Finance Corporation (IFC)”; Wakaaladda Maalgelinta Damaanada leh ee Dhinyada



Badan “Multilateral Investment Guarantee Agency (MIGA)”; iyo Xarunta Caalamiga ah ee Muranada Maalgelinta “International Centre for Settlement of Investment Disputes (ICSID)”. Hay’ad kasta waxay ka ciyaartaa door mudan hawsha la dagaalanka faqriga iyo hagaajinta heerka nolosha nololeed ee dadka addunka osoo koraya. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo [www.worldbank.org](http://www.worldbank.org), [www.miga.org](http://www.miga.org), iyo [www.ifc.org](http://www.ifc.org).